

Apple Health Expansion ayaa soo socda Luulyo 2024

Waa maxay Apple Health Expansion?

Miisaaniyadda dheeriga ah ee 2022 waxay Maamulka Daryeelka Caafimaad (HCA) fareysaa in uu sameeyo barnaamij gargaar caafimaad kaas oo caymis daryeel caafimaad oo u dhigma Medicaid siin doonna dadka waaweyn ee aan caymiska lahayn kuwaas oo aan ka soo bixin shuruudaha socdaalka ee loogu talagalay gargaarka federaalka.

Kumaa xaq u leh?

Waxaad xaq u yeellaa kartaa barnaamijkan haddii aad:

- Tahay qof Washington deggan oo da'diisu tahay 19 ama ka weyn,
- Leedahay dakhli la xisaabi karo oo ka yar 138% ee heerka saboolnimada federaalka,
- Aadan xaq u lahayn barnaamijyada kale ee Apple Health ee ku saleysan xaaladda socdaalka,
 - Muhaajiriinta aan ka soo bixin muddada sugitaanka shanta sanno si ay xaq ugu yeeshaan Apple Health xaq uma lahan Apple Health Expansion.
- Aadan uur lahayn ama aadan lahayn uur dhammaaday 12-kii bilood ee la soo dhaafay, iyo
- Aadan xaq u lahayn qorsheyaasha qualified health oo leh canshuur dhaafka lacagta joogtada ah ee caymiska ee horumarsan (APTC) ama barnaamijyada gargaarka caafimaadka ee ay dowladda federaalka maalgeliso

Ka ogow xaq-u-yeelashada barnaamijyada kale ee Apple Health hca.wa.gov/apple-health-eligibility.

Jaangooyada dakhliga

| Inta uu Qoyska Le'eg Yahay | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
|----------------------------|---------|---------|---------|---------|---------|
| Dakhliga Bil Kasta | \$1,732 | \$2,351 | \$2,969 | \$3,588 | \$4,207 |
| Inta uu Qoyska Le'eg Yahay | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 |
| Dakhliga Bil Kasta | \$4,825 | \$5,444 | \$6,063 | \$6,682 | \$7,300 |

*Ku saleysan jaangooyooinka Abriil 2024. Jaangooyada ku waajibta isbeddel sannad kasta.

Goormeen codsan Karaa?

Waxaad bilaabi kartaa codsashada Apple Health Expansion Gu'ga 2024.

Goormee ayuu caymisku bilowdaa?

Caymiska Apple Health Expansion wuxuu bilaabanayaa 1-da Luulyo, 2024.

Caymis caafimaad nooceee ah ayaa la heli karaa ka hor 1-da Luulyo, 2024?

Caymiska Kale ee Apple Health

Haddii aad u baahan tahay in aad dhakhtar u tagto hadda, waxaad hubin kartaa in aad xaq u leedahay Apple Health carruurta, Apple Health uurka, Caafimaadka Xaaladaha Degdeega ah ee Shisheeyaha (AEM) iyo Adeegyada Daryeelka Caafimaadka (MCS). Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah, booqo hca.wa.gov/apple-health-non-citizens.

Ikhtiyaarada Qorsheyaasha Qualified Health iyo Kaydka Cascade Care ee loogu talagalay muhaajiriinta

Dhammaan Reer Washington, iyadoo aan la eegayn xaaladda socdaalka, waxay hadda haystaan fursad ay ku dukaamaysan karaan oo ay ku iibsan karaan qorsheyaasha ilkhaa iyo caafimaad la aqoonsan yahay ee 2024. Ogow wax badan oo ku saabsan **ikhtiyaarada daryeelka caafimaadka muhaajirka** iyo kuwa kale ee **kharash dhaqaaleynta**.

Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Barta: hca.wa.gov/ah-expansion | Email-ka: ahexpansion@hca.wa.gov | Telefoonka: 1-800-562-3022